

Codbixinta marka uu Dambi Weyn kuu Diiwaangashan yahay

Dambi marka uu kuu diiwaangashan yahay **ma** saameynayo xuquuqdaada codeynta ee Minnesota haddii aadan hadda xabsi ugu jirin dambi aad u weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran, gobol kasta.

Codeynta iyo ka dib xukun ah dembi aad u weyn

Waxaad ka codeyn kartaa Minnesota ka dib markaad dhammeysato gebi ahaan xabsigaaga — sida baroobeysan, cafis shuruud ku xiran ama sii-deyn korka lagala soconayo — gobol kasta.

Sida ugu dhakhso badan ee aad u dhammeysato wakhtiga xabsiga, ama aan dambi awgiis lagu sii xirin ayaad u codeyn kartaa, laakiin ugu horreyn waa in aad is diiwaan geliso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta Maalinta Doorashada sannadkan waa saddex toddobaad ka hor maalinta doorashada. Haddii aadan markaas is diiwaan gelin, weli waxaad iska diiwaan galin kartaa goobta aad codka ka bixineyso Maalinta Doorashada.

Booqo mnvotes.org si aad u hesho macluumaadka diiwaan gelinta ama si aad u buuxsato codsiga.

Marka aadan hubin xaalkaaga sharci ahaaneed?

Haddii aad su'aalo ka qabto dambiyada kuu qoran, waxaad kala hadli kartaa sarkaalka/wakiilka ka war haya baroobeysankaaga ee Waaxda Xabsiyada Minnesota oo soo garaac 651-361-7200 ama la hadal waaxda diiwaanka.

Ma codeyn karaa...

Haddii la igu soo oogay ama la igu xukumay dambi yar ama dambi xoogaa yar weyn?

HAA

Haddii aan ku jiro xabsi, laakiin aan hadda xukunkeygu ahayn dambi aad u weyn?

HAA

Haddii la igu soo oogay dambi aad u weyn, laakiin aan weli la i xukumin?

HAA

Haddii dambi aan qirtay aan la ii qorin oo ciqaabtana la ii fududeeyo?

HAA

Haddii aan soo dhammeysto gebi ahaan xukun ah dembi weyn ee gobol kale?

HAA

Haddii aan soo dhammeystay gebi ahaan xukunka dambi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

HAA

Haddii aan hadda xabsi ugu jiro dembi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

MAYA

Haddii la igala noqdo dambi aan qirtay oo aan la ii qorin oo ciqaabtana la iga fududeeyey oo hadda xabsi la i dhigay?

MAYA



hennepin.us/elections